



Ku socota mas'uuliyiinta xannaanada carruurta iyo dugsiga


Vår referanse: 2019/38320-1
Dato: 19. september 2019

Degmada bergen waxay dooneysaa inay wada xiriirka u dhexeeya xannaanada carruurta/dugsiga iyo guriga fududeyso ayna adeegsato xal cusub oo digitaal ah.

Nidaamka waxaa la yiraahdaa Vigilo, waxaadna fursad u heleysaa albaabka mas'uulka (foresattportalen) adigoo u sii maraya barnaamij internet ee kombiyuutar/nettbrett ama soo dejinaya app-ka adeeg-bixiyaha.

Albaabka mas'uulka waxaad kala xiriiri kartaa shaqaalaha xannaanada carruurta ama dugsiyada qaarkood. Wararka farsamada sida maqnaanshaha iyo waxqabadyada, waa loo diri karaa lagana heli karaa xannaanada carruurta iyo dugsiyada. Ogoow in wararka xasaasiga ah ee qofka, sida tusaale ahaan cudurada, kiisaska gardarada ama iyo xuma ka sheega dadka kale, aan halkan la isugu direyn. Wixii warbixin dheeri ahoo ku saabsan xalka, gelista iyo sugidda wararka waxaad ka heleysaa bogga degmada www.bergen.kommune.no, adeegso ereyga «<vigilo>». www.vigil.no/bergen waxaad ka heleysaa warbixinta adeegsiga xalka.

Haddaad caawimaad u baahan tahay ama su'aal qabto, la xiriir dugsiga, xannaanada carruurta ama degmada Bergen adeeggeeda dadweynaha ee Kaigaten 4.



Haddaad ka gasho Vigilo barnaamij internet, waa inaad adeegsataa albaabka aqoosiga (ID-Porten) si si kalsooni iyo amni leh aad isugu cadeysid. Marka ugu horreysa aad gelaysid App-kan waa inaad doorataa «Bergen Kommune» marka ka dibna aad gasho ID-Porten. Markaas waxaa lagu weydiin doonaa inaad sameysatid PIN-kode afar lambar ah, Touch-ID ama waji garasho (ansiktsgjenkjenning) si aad sahal ugu gashid App-ka marka ku xigta ee aad adeegsan sid. Xog: ogolow dhamman waxa App-ku kaa rabto. Lambarkaaga teleefanka gacanta e-boostadaada waxaa laga doonanayaa diwaanka qaranka xiriirka iyo iska reebidda (kontakt og reservasjonsregister) Xog: haddaad adeegsanso kombiyuutar/nettbrett Vigilo waxay si wanaagsan ugu shaqeynaysaa barnaamijka internetka ee Google Chrome.

hadday carruur kuu dhigato xannaanada carruurta iyo dugsiyada degmada, waxaa ka heli doontaa dhamman carruurtada App sku mid ah. Haddii ilmuhu leeyahay wax laba magac ka badan labada magac ee ugu horreeya oo keliya ayaa ka muuqaneysa App-ka. Xiriirka ilmaha u la leeyahay mas'uulka waxaa laga doonanayaa xafiiska diwaan gelinta dadka. SFO-du waxay adeegsan doonta xalkan ka dib bilashada sanadka.

Med hilsen
Jan Eide
Seksjonsleder
HR, digitalisering og virksomhetsstyring